| | |
|---|---|
| **Xarunta Daryeelka Ilmaha**<br><br>**Daryeelka Ilmaha Qoyska** | # Hagaha Kaqaybqaataha<br><br>## Dhimashada Degdega ah ee Lama filaanka ah ee Ilmaha |
| **Ogoosto 2024**<br><br>**Qaabkaan halka saac ah wuxuu buuxinayaa**<br><br>**Shuruucda MN, farqada 142B.65 iyo**<br><br>**Shuruucda MN, farqada 142B.70** | **1 saac** |

**Xuquuqda lahaanshaha iyo Xadidnaanta Isticmaalka iyo Mas'uuliyadaha ka dhalanaya**

Manhajkaan waxaa lagu diyaariyay maalgalin ay bixisay Waaxda Caruurta, Dhalinyarada iyo Qoyska ee Minnesota.  Waaxda Caruurta, Dhalinyarada iyo Qoyska ee Minnesota wax wakiil ah kama ahan wax mas'uuliyad ahna kama saarna isticmaalkiisa ama natiijadiisa.  Manhajkaan dib loolama bixi doono, lama koobin karo, lama iibin karo ama si kale looma qaybin karo ayada oo aan ogolaansho qoraal ah laga haysan Waaxda Caruurta, Dhalinyarada, iyo Qoyska ee Minnesota.

Si aad u codsato ogolaansho qoraal ah oo ku saabsan isticmaalka ama dib usoo saarista qayb kamid ah manhajkaan, iimayl u dir DCYF.Child.Care@state.mn.us.

# Guudmarka Kulanka

## Qaybta Nuxurka Hanaanka Aqoonta iyo Howlkarnimada (KCF, Knowledge and Competency Framework) Iyo Qaybaha Nuxurka CDA

Nuxurka Hanaanka Aqoonta iyo Howlkarnimada Iyo Qaybaha Nuxurka CDA halkaan ayay ku qoranyihiin si ay ka qyabqaateyaasha uga caawiyaan fahamka waxa ay yihiin qaybaha howlkarnimada, nuxurka iyo/ama waxyaabaha muujinaya looga hadlo tababarkaan.

Qaybta Nuxurka KCF: VII. Caafimaadka, Badqabka, iyo Nafaqada

Qaybta Nuxurka CDA: Ammaanka, Caafimaadka, Bii'ada Waxbarashada

### Ujeedooyinka Waxbarashada

- Garashada iyo in si joogto ah looga shaqeeyo yaraynta qodobada khatarta ah ee keena Dhimashada Degdega ah ee Lama filaanka ah ee Ilmaha, SIDS, neef-qabatinka, iyo dhimashada kale ee ilmaha ee hurdada la xiriirta ee ka dhacda barnaamijka bixiyeyaasha daryeelka caafimaadka dhexdiisa.
- Si guul ah dib u eegista shuruudaha Sharciga Daryeelka Caruurta ee MN ee la xiriira hurdada ammaanka ah ee ilmaha.
- Garo cawaaqibta ka dhalata u hogaansami la'aanta shuruucda.

### Kulanka 1 Onleen ah

| Qaybta | Guudmar |
|---|---|
| Soodhaweyn iyo Horudhac | • Soodhaweyn iyo Horudhaca<br>• Kooxda Balaaran |
| Qeexitaanka iyo Dhacdada | • American Academy of Pediatrics iyo Ereybixinada<br>• Xogta MN<br>• Muuqaal<br>• Kooxda Balaaran |
| Shuruudaha Sharciga ah ee MN ee Yaraynta Khatarta Dhimashada Degdega ah ee Lama filaanka ah ee Ilmaha | • Shuruudaha Sharciga MN – Shuruucda MN, farqada 142B.46<br>• Shuruucda kale ee MN la xiriita iyo Sharciga<br>• Muuqaalo<br>• Kooxda Balaaran |
| Istiraatiijiyadaha Yaraynta Dhimashada Degdega ah ee Lama filaanka ah ee Ilmaha | • Talooyinka American Academy of Pediatrics<br>• Muuqaalo<br>• Kooxda Balaaran |
| Arrimaha kale ee Hurdada Ammaanka ah La xiriirta | • Kooxda Balaaran |

| | |
|---|---|
| Cawaaqibta ka dhalata Inaan la Raacin Shuruucda Hurdada Ammaanka ah | • Kooxda Balaaran |
| Natiijada iyo Dulmarka | • Kooxda Balaaran<br>• Muujinta Shakhsiyaadka |

## Guudmarka Talooyinka AAP oo leh Shaxda Talooyinka Culus 2 2022

**ASSB**, **ceejinta shilka ah ama neef-qabatinka sariirta dusheeda ah** - waxaa lagu sharaxaa dhimashada degdega ah ee lama filaanka ah ee ilmaha ee ka dhacda meesha uu hurdo (sariirta, sariirta ilmaha, fadhiga, ama kursiga, iwm) sanka ama afka ilmaha xanibaya, ama qoorta ama xabadka lagu dhajiyo gogol jilicsan ama dabacsan, oo ku daboolan, ama dhexgalista laba shay taasoo keenaysa neef-qabatin. Waxay ku beegantahay ICD-10 W75

**Wadaagista sariirta** - Waalidka(diinta) iyo ilmaha ku wada seexanaya hal gogol (sariir, kursi, ama fadhi). Baareyaasha caafimaadku waxay doorbidaan ereyga "wadaagista gogosha."

**Daryeelbixiyeyaasha** - Dukumiintiga oo dhan, "waalidiinta" ayaa loo isticmaalayaa, laakiin ereygaan waxaa loola jeedaa daryeelbixiyeyaal kasta oo ilmaha ah.

Wada seexashada - Ereygaan waxaa inta badan loo istimaalaa daabacaadaha, laguma talinayo sababtoo ah ma cadda, inay isbadasho marka loo isticmaalo hurdada masaafada dhow (sidam wadaagista qolka) iyo/ama gogosha hurdada ama wadaagista sariirta.

**Wadaagista qolka** - waalid(diinta) iyo ilmaha hurda halka qol oo goglo kala duwan ah.

**SIDS (Xanuunka dhimashada degdega ah ee ilmaha)** - sababta loo garto inay ka danbayso dhimashada ilmaha taasoo aan la sharixi karin kaddib markii baaritaan adag lagu sameeyo kiiiska, oo ay kamid tahay baaritaanka goobta dhimashadu ka dhacday, baaritaanka jirka maydka, iyo dib u eegista taariikhda caafimaadka.

**Dhimashada ilmaha ee hurdada la xiriirta** - dhimasho degdega ah oo lama filaan ah taasoo dhacda inta lagu jiro xili hurdo oo ilmaha lala joogay ama aan lala joogin, ama goobta hurdada ka dhacda.

**Dimashada Degdega ah ee lama filaanka ah (SUID)** - Dhimasho degdega ah oo lama filaan ah, haddii sharaxaad loo hayo iyo hadaan loo haynba (waxaa kamid ah SIDS), dhacda xiliga caruurnimada**.** Waxaa qeexaya Xarunta Qaran ee Jaantusyada Caafimaadka si ay u fasirto geerida ka dhalata sababta xeerka ICD-10 R95, R99, or W75.[24]

**Wadaagista Gogosha** - Wadaagista gogosha: Waalidka(diinta) iyo ilmaha ku wada seexanaya hal gogol. Baareyaasha caafimaadku waxay ka doorbidaan ereyga "wadaagista gogosha" "wadaagista sariirta."

**Dhimashada degdega ah ee aan la sharixin ee ilmuhu ama xanuunka dhimashada ilmaha ee degdega ah (SIDS)** - Dhimashada degdega ah ee lama filaanka ah ee ku dhacda ilmo caafimaad qaba oo ka yar da'da 1 sanno, kaasoo baaritaan, baaritaanka maydka, dib u eegista taariikhda caafimaadka, iyo baaritaanka shaybaarka ee saxda ah ku guuldaraystaan inaan ogaadaan sababta gaarka ah, oo ay kujiraan kiisaska buuxiya shuruudaha xanuunka dhimashada degdega ah ee lama filaanka ah ee ilmaha.[6] Guddiga khubarada ah ee matalaya National Association of Medical Examiners wuxuu ku talinayaa isticmaalka dhimashada degdega ah ee lama filaanka ah ee ilmaha oo aan la isticmaalin xanuunka dhimashada ilmaha ee degdega ah.[5]

**Ku xanibnaanta ama dhexgalista** - waa qaab neef-qabatin ah ama ceejo jirka ah kaasoo sanka iyo afka ama hunguriga la dhuujinayo ama la xirayo sabab la xiriirta in ilmuhu ku xanibmay ama dhexgalay waxyaabo aan dhaqdhaqaaqayn, taasoo kahortagaysa neefsiga.[537] xaalada xanibnaanta ee ugu badan waa marka ilmuhu dhexgalo joodariga iyo darbiga (ama fareemka sariirta) ee sariirta qofka weyn.

**Qeexitaanada:**

**Shuruudaha Sharciga ah ee MN ee Yaraynta Khatarta SUID**

**Talooyinka AAP- Istiraatiijiyadaha Yaraynta Khatarta SUID**

**Arrimaha kale ee Hurdada La xiriira**

__________________________________________________________________________

__________________________________________________________________________

__________________________________________________________________________

**Cawaaqibta ka dhalata Inaan la Raacin Shuruucda Hurdada Ammaanka ah**

__________________________________________________________________________

__________________________________________________________________________

__________________________________________________________________________

__________________________________________________________________________

__________________________________________________________________________

__________________________________________________________________________

## Natiijada, Dulmarka

**Ka fakarista daryeelkaaga maalinlaha ah ee hurdada ammaanka ah.**

| | |
|---|---|
| Xagee ilmaha cuntada ku siisaa? | |
| Waa maxay waxyaabaha aad qabato marka aad leedahay ama aad haysato wakhtiga u seexashada caloosha ee ilmaha uuna seexdo? | |
| Qolkee ayay ilmuhu seexdaan? | |
| Sidee u korjoogtaysaa ilmaha marka ay hurdaan? | |
| Sidee ilmaha uga dhigtaa kuwo diiran una raacdaa shuruudaha shatiga? | |
| Maxaad samaysaa si aad usoo jeedo marka aad leedahay maalin daal badan? | |

| | |
|---|---|
| Yaad la xiriirtaa si ay kuu dhiirigaliso? | |
| Waa caadi inaad maalmo adag wajahdo ama xaalado adag marka aad caruurta daryeelayso. Sidee u smaayn kartaa isdaryeelis wanaagsan inta lagu jiro xiliyadaas ama maalmahaas adag? | |

**Ka fakarista nidaamyada barnaamijkaaga.**

| | |
|---|---|
| Sidee u qorshaysaa in ilmuhu helaan goob ammaan ah oo ay seexdaan? | |
| Maxaad badali lahayd ama ku dari lahayd nidaamkaaga adigoo ku salaynaya tababarkaan? | |
| Sidee ugu lugyeelataa waalidiinta ama ugu wargalisaa waalidiinta nidaamkaaga huradada ammaanka ah? | |
| Maxaad samayn kartaa oo ka sareeya kana badan waxa uu kugu waajibanayo sharciga MN si aad u yarayso khatarta Dhimashada Degdega ah ee Lama filaanka ah ee Ilmaha? | |

**Linkiyada iyo Ilaha American Academy of Pediatrics**

- Dhimashada Ilmaha ee Hurdada La xiriirta: Talooyinka 2022 ee Wax laga badalay ee loogu talagalay Yaraynta Dhimashada Ilmaha ee Goobaha La seexiyo | Pediatrics | American Academy of Pediatrics (aap.org)
    - AAP Qeexitaanada Shaxda Ereyada 1 2022
    - Guudmarka Talooyinka AAP oo leh Shaxda Talooyinka Culus 2 2022
    - AAP Tilmaamaha Hurdada Ammaanka ah oo si Weyn Wax looga badalay ilaa iyo 2016 Shaxda 3

**Sharciyada Shatiyada MN, Shuruucda, iyo linkiyada**

- Sharciga 2 MN ee Daryeelka Caruurta Qoyska
- Sharciga 3 MN ee Xarunta Daryeelka Caruurta Qoyska
- Xeerka MN, qaybta 142B.70 Shuruudaha Tababarka Daryeelka Caruurta Qoyska

- Xeerka MN, qaybta 142B.65 Shuruudaha Tababarka Daryeelka Caruurta Qoyska
- Shuruucda MN, qaybta 142B.46 Yaraynta Khatarta Dhimashada Degdega ah ee Lama filaanka ah ee Ilmaha ee ka dhacda Barnaamijyada Shatiga haysta
- Shati bixinta Daryeelka Ilmaha Qoyska Qorshaha meelmarinta isbadalada sharci ee 2023 (mn.gov)
- Xarumaha Daryeelka Ilmaha ee Shatiga haysta: Qorshaha meelmarinta isbadalada sharci ee 2023 (mn.gov)
- Shuruucda MN, farqada 142B.45 Shuruudaha Ammaanka Sariirta Ilmaha
- Gacan ka gaysashada bixiyeyaasha daryeelka caruurta qoyska ee shatiga haysta / Waaxda Adeegyada Bulshada ee Minnesota (mn.gov)

**Dhimashada Degdega ah ee Lama filaanka ah ee Ilmaha (SUID) muuqaalo-Daryeelka Ilmaha Qoyska**

Waaxda Adeegyada Bulshadu waxay ogolaatay muuqaalada soo socda ee is xigxiga si ay u buuxiso qaybaha SUID marka shakhsiyaadku aysan helayn tababarka SUID oo toos ah, fasalka ah, ama onleen ah. Dhammaanba muuqaalada waa in la daawadaa si loo buuxiyo shuruudaha tababarka ee SUID.

Fadlan ogsoonoow: Muuqaalada hoose waxaa kamid ah sawiraanta bii'ada hurdada ee ilmaha ee gaarka ah, aan shatiga haysan, guryaha aysan khusayn shuruudaha Shuruucda Minnesota, qaybta 142B.46. Bixiyeyaasha daryeelka caafimaadka ilmaha ee shatiga haysta waa inay u hogaansamaan shuruudaha hurdada ammaanka ah marka ay ilmaha seexinayaan oo ay kamid tahay in aan waxba ku dhex jirin sariirta marka laga reebo cinjirka ilmuhu nuugo. Intaas waxaa dheer, waxyaabah ku xiran ama wax ka badalista sariirta waa mamnuuc.

- Hurdada Ammaanka ah (waxaa soo diyaarisay Hennepin County, 4:17)
- Habraacyada Hurdada Ammanaka ah (Waxaa soo diyaariyay Eastern Virginia Medical School, 5:50)
- Ku dul seexo - Kahortagista Nidaamyada Hurdada ee Aan ammaanka ahayn (Waxaa soo diyaarisay Dakota County, 6:28)

**Waaxda Caafimaadka MN**

- Dhimashada Ilmaha ee Hurdada La xiriirta: Talooyinka 2022 ee Wax laga badalay ee loogu talagalay Yaraynta Dhimashada Ilmaha ee Goobaha La seexiyo (state.mn.us) pdf
- Su'aalaha Inta badan La iska weydiiyo Hurdada Ammaanka ah (state.mn.us) pdf

**Ilo Dheeraad ah**

- Diiwaanka Federaalka: Habraacyada Ammaanka ee Sariirta Baaxadda Canuga leh iyo Sariirta Aan lahayn Baaxadda Canugga; Sharciga Ugu danbeeya
- Muuqaal | Safe to Sleep® (nih.gov) Wax ka baro Talooyinka 2022 ee ku saabsan Yaraynta Khatarta Dhimashada Ilmaha ee Hurdada L axiriirta

**Guddiga Nabadgalyada Badeecad La isticmaalo**

- Dib loo soo celiyay | CPSC.gov
- Dhaqangalinta Hagitaanka ee Bixiyeyaasha Daryeelka Ilmah ee daryeelka Caruurta | CPSC.gov